Mustaqbalka ilmahaaga xagga Farbarashada iyo Tirabarashada ee Dugsiyada Australia

Waalidka Qaaliga ahow,

Wax akhriska, qoristu iyo xisaabtu waa xirfadaha aas aasiga ah ee ugu muhiimsan ee carruurteenu u baahan tahay inta ay waxbarashada ku jiraan. Xirfadaahan waa muhiim si loo hubiyo in wadaniyiinteena yar yari ay awoodaan inay si buuxda uga qayb galaan bulshada Australia islamarka ay dugsiga dhameeyaan.

Taasi waxay saartaa masuuliyad aad u weyn dadka dawlada ku jira, macalimiinta iyo inaga waalid ahaan inaynu u aragno in carruurteenu u bartaan xirfadahaan si wanaagsan.

Waalidiinta, oo ah macalimiinta ugu horeeya ee carruurteena, waxay shirko muhiim ah kula leeyihiin macalimiinta shaqadaan.
Taasi waa sababta aan idiinku soo qorayo – si aan idinla wadaago waxay dawlada dhexe qabaneyso si ay u hagaajiso xirfadaha wax akhriska, waxqorista iyo xisaabta ee ardayda oo dhan gaar ahaan kuwa ay ka hortimaado dhibaatooyinka iyo silicu.

Waxaan rajeynayaa in macluumaadkan inuu noqdo mid faa'iido idiin leh

Mahadsanidiin

Dr Brendan Nelson
Wasiirka Waxbarashada,Sayniska iyo Tababarada

Meelaha laga bilaabayo

Waa maxay Farbarashadu? Waa maxay Tirabarashadu?

Farbarashadu waa awooda wax lagu akhriyo, qoro, hadlo oo loogu dhegeysto afka si u ogolaanaysa dadka inay isla hadlaan iyo inay aduunka qiimo uyeelaan.

Xisaabtu waxay naga caawisaa inaan si wax ku ool ah u isticmaalno xisaabta si aynu ula nimaadno baahida guud ee nolol maalmeedka guriga, shaqada iyo guud ahaan bulshada dhexdeeda. Waxay sidoo kale, nagu caawisaa inaan waxbarano oo aanu aduunka qiimo u yeelno.

Waxaa micniheedu yahay in qofka wax akhriya ama wax qoraa xisaabtana yaqaan uu isla bedelo aduunka.

Beryahan, tusaale, carruurtu waxay u baahan yihiin inay isticmaalaan tignoolajiyada cusub sida kumbiyuutarada, interneetka iyo xisaabiyayaasha iyo sidoo kale buugga akhriska iyo qorista oo ku saabsan maadooyin aad u balaaran.

Sidee baa ardeyda Australian -ka ahi wax u bartaan?

Sanadihii yaraa ee la soo dhaafay, waxaa Australia lagu qabtay laba sahan oo qaran si loo tijaabiyo wax akhriska iyo qorista iyo xisaabta ardadeena.

Sahanka Farbarashada Ingiriiska ee Dugsiga Qaranka oo la qabtay 1996 wuxuu soo saartay sawir aad u wanaagsan oo ah in ardeyda dugsigyada Australianka ay gaareen heer wanaagsan oo wax akhris iyo qoris ah. Carruurta baaritaankan lagu sameeyey waxay ahaayeen fasalada 3 iyo 5, oo badanaa da'doodu ahayd 8 iyo 10. Natiijadu waxay tustay tiro aad u balaaran oo ah – agagaarka 27% oo ah ardeyda fasalka 3 aad – waxay ku guuldareysteen inay la yimaadaan heerka ugu hooseeya ee wax akhriska iyo qorista ee wakhtigaas. Baaritaankaasi wuxuu sidoo kale tusay inay wiilashu aad uga hooseeya gabdhaha marka loo eego horumarkooda wax qorista iyo akhriska iyo in ardey fara badan oo ah dadkii dalkan loogu yimid inayan si lagu qanco waxna u akhrin karin una qori karin.

1997, Golaha Baaritaanka Waxbarashada Australia ayaa soo daabacay wixii ka soo baxay sahamin ku saabsan wax akhriska iyo qorista iyo xirfadaha xisaabta in ardeyda 14-ka sanno jirtaa la ururunayey in ka badan 20 sanno laga soo bilaabo 1975 – 1995. Natiijadii sahanku waxay tustay:

- Inuu jiray hoos u dhac u dhaxeeya inta ah wiilasha fasalka 9-aad ee (14-ka sanno jira) si wanaagsan wax ubarashadooda fahamka wax akhriska oo sameynaya farqi weynaanaya oo u dhaxeeya wiilasha iyo gabdhaha oo ah 3% ilaa 8% meeshan; iyo

- Waxaa jiray kooxo ardey ah oo muhiim ah si la dareemi karo uga hooseeyey ardeyda kale, gaar ahaan ardeyda uusan afka guriga ay ku hadlaani uusan ahayn Ingiriis.

Labadaan baaritaanba waxay muujiyeen inay jirto baahi deg deg ah oo ah in la siiyo mudnaan qaran wax akhriska, qorista iyo xisaabta. Dawlada dhexe way ka jawaabtay baahidaas.

Maxaa la qabtay?

Sida waalidiinta, Dawlada Dhexe waxay rumeysan tahay awooda dhammaan ardeyda oo dhan iyo in ay qaadeyso talaabooyinkii lagama maarmaanka ahaa si loo hubiyo in ardeyda oo dhami gaaraan ilaa waxa ugu sareeya ee ay qaban karaan si ay uga qayb galaan si wax ku ool ah bulshadaan diimuqraatiga ah.

Rumeyntani waxay xoojineysaa mudnaanta la siiyey wax akhriska iyo qorista iyo xirfadaha xisaabta ee ah inay gaaraan horumar dhab ah carruurta Australianka ahi.

Dawlada dhexe waxay si isdaba joogta u tilmaantay baahida ah in la ururiyo oo laga war bixiyo sida ardeydu wax ugu baranayaan dugsiga, khaas ahaan meelaha muhiim ka ah sida wax akhriska iyo qorista iyo xisaabta si aynu u hubino in ardeyda oo dhami ay gaarayaan heerka ugu hooseeya ee lagama maarmaanka ah si ay dugsiga ugu horumaraan.

Talaabooyinkii ugu waa weynaa ee dalka oo dhan ahaa waa la qaaday si loo hubiyo in wax akhriska, qorista iyo xisaabta heerarkoodu horumaraan.

- **Ujeedooyinka Qaranka** waxaa loo dejiyey inay dareenkooda saaraan iyo tamarba meelaha ugu waa weyn ee qaran ahaan la saluugsan yahay. Tani waxay ka dhigeysaa wax akhriska iyo qorista iyo xisaabtaba mudnaanta dawlada dhexe, ta gobol, iyo terretorigaba. mid ka mid ah ujeedooyinku waa:

  Ardeydu waa inay gaaraan xirfadaha xisaabta, wax akhriska iyo qorista, sida in ardey kasta waa inuu yaqaan xisaabta, awoodo wax akhriska, wax qorista, higaadinta oo uu ku hadli karo ilaa heerka ku haboon.

- **Qorshaha Xisaabta,** wax akhriska iyo qorista ayaa la sameeyey. Qorshaha waxaa ku jira ficiladan muhiimka ah ee soo socda:
  - Qiimeynta macalinka ee ardeyga marka ugu horeysa ee suurto galka ah sanadaha ugu horeeya ee dugsiga;
  - Wax qabadka wakhtiga hore ardeyda lagu arko inay dhib haysato;
  - Warbixin qarameed ah heerarka ay ardeydu gaarayaan marka loo eego heerka laga rabo; iyo
  - Horumarinta aqooneed si loo taageero shaqada macalimiinta.

- **Heerka laga doonayo ee Xisaabeed**, wax akhris iyo qoris ee fasalka 3-aad, 5 iyo 7 waa la sameeyey. Heerarkan waa heerarka ugu hooseeya ee lagama maarmaanka ku ah ardeyda inay ku horumaraan dugsiga.

  Oo bilaabanaya 1999, qiimeynta lagu sameeyey heerarka qaranka si kordheysa ayaa loo bilaabay 1999, ugu dhawaana boqolkiiba 87 ardeyda way gaareen heerka wax akhriska ee fasalka 3-aad. Laga bilaabo 2001, dhammaan ardeyda fasalka 3aad dhigata iyo 5-aad waa la qiimeynayaa iyadoo loo eegayo heerarka qaranka ee wax akhriska iyo qorista iyo xisaabta. Dhammaan gobolada iyo Territoriska waxay sidoo kale tijaabinayaan ardeyda fasalka 7aad dhigata iyagoo u eegaya heerarka xisaabta, wax akhris iyo qorista. Dugsiyadu waxay natiijada warbixinta shakhsiyeed ee qiimeynta ardeyga u gudbinayaan waalidka. Dugsiyada qaarkood iyo haayadaha waxbarashada ayaa sidoo kale ka warbixinta ah natiijada qiimeynta iyadoo loo eegayo heerarka qaranka.

- **Istaraatijiyada Xisaabta**, Wax Akhriska iyo Qorista Ingiriiska ee Qaran ee Dadka dhulkan loogu yimid ee la bilaabay 2000 iyadoo wadatay maalgelin ah $27 milyan, waxay dejinaysaa qorshe faahfaahsan oo lagu horumarinayo natiijooyinka waxbarasho ee ardeyda dadka dalkan loogu yimid.

Waalidiintu waxay ka yihiin shirko muhiim ah carruurtooda waxbarashadooda xaq bayna u leeyihiin inay ogaadaan sida ilmahoodu u horumarayo.
Bulshadu waxay sidoo kale xaq u leedahay inay ogaato sida dugsiyada iyo haayadaha waxbarashadu wax u qabanayaan.
Laga bilaabo 2001, haayadaha waxbarashadu waxaa laga dooni doonaa inay warbixin ka soo bixiyaan waxyaalaha lagu cabiro waxqabadka ee muhiimka ah, oo ay kujiraan heerarka waxqorista iyo wax akhriska iyo xisaabta, si ay u helaan maalgelinta dawlada dhexe.
Xooga ay saartay dawlada dhexe sanadahan danbe horumarinta heerarka xisaabta,wax akhriska iyo qorista wuxuu ilaa hadda muujiyey horumar la taaban karo. Akhbaarta qaran ahaan laysbarbar dhigi karo ee fasalka 3aad ee la siidaayey maarso sanadka 2000

waxay muujisay in boqolkiiba ardayda fasalka 3aad ee Australia ee aan gaarin heerka ugu hoseeya ee layska doonayo inuu hoos uga dhacay 27% oo ahayd 1996 ilaa 14% sanadkii 1999. Horumar dheeraad ah ayaa la rajeynayaa in lagu dhawaaqo sanadkan dhammaadkiisa marka la sii daayo qiimeynta xisaabta, wax akhriska iyo qorista ee Gobolada iyo Territoriyada.

Waxbarshada Macalinka

Waxbarida wanaagsani waxay u keeneysaa ardeyda natiijo wanaagsan. $80 milyan oo ah waxyaalaha ay bilowday Dawlada Dhexe, Macalimiinta Qarniga 21aad, waxay horumarineysaa xirfada macalimiinta iyo aqoonta ee meelaha muhiimka ah sida wax akhriska, qorista iyo xisaabta.

Maalgelinta Dawlada Dhexe

Laga bilaabo 1997 ilaa 2000 Dawlada dhexe waxay maalgelisay ilaa $376 milyan si ay u hubiso in dhammaan ardeyda oo dhami gaar ahaan kuwa ugu baahida badan inay horumariyaan xirfadahooda xisaabeed, wax akhris iyo qoritaan. Afarta sanno ee socda (2001-2004) ugu dhawaan $1.4 bilyan oo ah maalgelinta Dawlada dhexe ayaa lagu bixinayaa istaraatigiyada caawimaadeed ee lagu horumarinayo barnaamijka natiijada ardeyga. Maalgelinahani waxay abaareyaan mudnaanta lagu horumarinayo wax akhriska, qorista iyo natiijooyinka xisaabta iyo caawinta ardeyda iinta leh.

Dawlada dhexe waxay bilowday toddobaadkii wax akhriska, qorista iyo xisaabta oo u dabaaldegaya kor u qaadayana natiijo fiican oo laga gaaro wax qorista, akhriska iyoxisaabta. Sanadkii hore, maalgelin ka badan $1milyan, oo ay ku jirto71 abaalmarinood oo lacag cadaan ah oo la siiyey dugsiyada ku guuleystay abaal marinaha ah inay gaareen heerkii wax akhris, qoris iyo xisaabeed, ayaa la siiyey dhacdaan inay u dabaaldegaan 2002, todobaadkii wax akhriska, qorista iyo xisaabta waxaa la qaban doonaa laga bilaabo 2 ilaa 8 septeembar iyadoo la siinayo isla maalgelin isku mid ah oo ka badan $1milyan si loogu taageero natiijada wanaagsan ee wax akhriska, qorista iyo xisaabta.

Waxa dugsiyadu sameynayaan?

Dugsigyada iyo macalimiintuba waxay xooga saarayaan siyaalaha ugu wanaagsaneyd ee ay u bari karaan wax akhriska, qorista iyo xisaabta. Nooc ahaan dugsiyada ku guuleysta halkaan:

- Waxay saaraan mudnaan aad u sareysa wax akhriska, qorista iyo xisaabta, badanaa iyagoo u sameynaya qorshe dugsiga oo dhan;
- Waa inaad hubisaa inay jirto wakhti aad u badan maalin kasta oo lagu barayo laguna horumarinayo xirfadaha wax akhriska, qorista higaada iyo horumarinta xirfadaha xisaabta.
- Sii fursado lagu dhigi karo wax akhriska, qorista iyo xisaabta manhajka gudihiisa oo dhan si xirfadahaan loogu isticmaalo siyaalo kala duwan iyo ujeedooyin kala duwanba;
- Waa inaad yeelataa qiimeyn hore oo aad qorshaysaa khibrada waxbarasho baahiyaha gaarka ee ardeyda, khaas ahaan kuwa la halgamaya;
- Si joogta ah ula soco tijaabina xirfadaha ardeyda;
- Ku yeelo shirko xoog badan oo ka dhaxeysa guriga iyo dugsiga.

Waxaad sameyn kartid waalid ahaan

Baaritaan ayaa si aad ah u muujiyey in marka waalidiintu ay ku lug leeyihiin waxbarashada carruurtooda, dhiirigelinta ardeyga iyo meesha uu gaarayo way horumartaa.

Bilowga ugu wanaagsan ee wax akhris, qoris iyo xisaabeedba ee ardeygu heli karo waxay ka iman kartaa guriga, waxaa jira waxyaalo sahlan, waxyaalo aad maalin kastaa sameyn karto si aad ugu dhiiri geliso wax akhris, qoris iyo xisaab barashada. Waxaad sameyn kartaa:

- Ku dhiiri geli carruurtaada inay ka hadlaan waxyaalaha ay soo mareen;
- Wax wada akhriya
- Dareenkiisa usoo jeedi wax akhris, qoris iyo xisaabta ee ka dhaca nawaaxigiisa maalin kasta;
- Carruurtaadu ha la qabsato tirada iyo xajmiyada kala duwan iyo qaababka oo ah waxyaalo sahlan sida alaabta lagu cayaaro;
- Wada akhriya jadwalka ama khariiradaha;
- Xisaabta barashadeeda feker fiican ka hayso qiimeena in dhamaanteen isticmaali karno xisaabta si ay nooga caawiso nolol maalmeedkeena;
- Isticmaal buuggaag, waxbarasho kuna dhiiri geli ilmahaaga inuu isticmaalo maktabada buuggaagta ka helitaan ahaan iyo si aad macluumaad uga raadsatoba.
- Wakhti samee aad kula hadasho macalinka ardeygaaga xiriirna la lahow dugsiga ilmahaaga hadduu yahay dusiga hoose dhexe ama mid sareba.

Waalidiinta iyo macalimiinta oo wada shaqeeyaa waa taageerada ugu wanaagsan ee guul lagu gaari karo.

Carruurteena darteed iyo mustaqbalka dalkeena waxaynu u baahan nahay in aynu kawada shaqeyno loolanka aas aasiga ah ee waxbarasho.

Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad dooneyso inaad ogaato wax badan oo ku saabsan sidii aad u caawin lahayd ilmahaaga, fadlan weydii macalinka ardeygaaga ama maamulaha. Labada urur ee waalidiinta ee ugu sareeya, ururada Dugsigyada Gobolka ee Golaha Australia (ACSSO) iyo Golaha Waalidiinta Australia (APC) waxay sidoo kale daabacaan buugag yar yar oo qiimo badan oo gaar ahaan loogu tala galay inay siiyaan talo waalidiinta, macluumaad waxaa sidoo kale laga heli karaa Website-dada soo socda:

DEST http://www.dest.gov.au/schools/literacy&numeracy/index.htm
APC http://www.austparents.edu.au
ACSSO http://www.acsso.org.au

Haddii aad jeclaan lahayd koobiyaal badan oo ah buugan yar fadlan kala xiriir Clearinghouse ka Farbarashada iyo Tirabarashada telefoonka ah 07 3875 5703.

Buugan yar wuxuu sidoo kale ku yaal Internetka:
http://www.dest.gov.au/schools/publications/index.htm